

Warqadda Koodha QR Ee Boostada Lagu Diray

Taariikhda:

Ku socota:

Mudane/Marwo

Laga bilaabo Juun 1, kaqeybgalayaasha Special Supplemental Nutrition Program for Women, Infants, and Children (WIC, Barnaamijka Nafaqada Dheeraadka ah ahna Gaarka ah ee Dumarka, Dhallaanka, iyo Carruurta) ee Washington waxa ay adeegsan doonaan Koodhka Jawaabta Degdegga ah (QR) si aad ugu iibsato kababkaaga miraha iyo khudaarta billaha ah ee WIC waxa ayna Farmers Market Nutrition Program (FMNP, Barnaamijka Nafaqada ee Suuqa Beeraleyda) ka faa'iideysan doonaan suuqyada beeraleyda loo igmay ama bakhaarada beeraha.

Fadlan koodhkaaga QR kudheji qaybta hore ee Kaarkaaga WIC. Waxaan sidoo kale kugu boorineynaa inaad taleefankaaga sawir uga qaado koodhka QR, haddii ay suurtagal tahay.

Fadlan xasuusnoow tallaabooyinka aad ku adeegsaneyso koodhkaaga QR:

1. Koodhkaaga QR, ama sawirkiisa, u qaado suuqa beeraleyda loo igmay ama dukaanka beeraha.
 - Adeegso Ablikeeshinka WICShopper ama booqo webseedka [Washington WIC Farmers Market Nutrition Program](#) (lagu heli karo Af Isbaanish) si aad u hesho liiska suuqyada beeraleyda loo igmay ama bakhaarada beeraha.
 - Raadi beeraleyda leh astaanta "WIC & Senior Farmers Market Benefits Welcome Here (WIC & Kababka Suuqa Beeraleyda Dadka Waaweyn Halkan Haku Soo Dhawaadaan)".
 - Kaliya iibso miraha iyo khudaarta la oggolaaday ee fareeshka ah, ee wadaniga ah, iyo bagalada fareeshka ah, jarjaran ee la cuni karo. Webseedka ka eeg liiska cuntooyinka la oggolaaday.
2. Xaqiiji inaad taqaano BIIN kaaga 4-ta god ah. Isla BIIN isku mid ah u isticmaal Kaarkaaga WIC.
 - Haddii aadan xasuusan BIIN kaaga, wac 1-844-359-3104 si aad biinka u badesho xiligaad rabto, maalin iyo habayn. Lambarkan wuxuu ku qoran yahay dhabarka danbe ee kaarkaaga WIC.
 - Gali taariikhda dhalashada qofka kaarka leh iyo koodhka boostada.
3. Eeg si aad u aragto kababka miraha iyo khudaarta aad haysato ee aad heli karto.
 - Adeegso Ablikeeshinka WICShopper.
 - Ka fiiri Liiska Dukaamaysiga haddii mid lagu soo lifaaqay.
 - Ka fiiri risiidkaagii ugu danbeeyay ee aad wax ugasoo iibsatay dukaanka WIC.
 - Wac xarunta WIC.
4. Kadib marka aad doorato badeecadaada, beeraalaha tus koodhka QR, beeraaluhu waxa uu gelin doonaa wadarta qadarka iibsiga, waxaadna ku aqbaleysaa qadarka iibsiga adiga oo BIIN kaaga gelinaya aaladda taleefanka ee beeraalaha.

Fadlan Taageerada Cascades ka wac 1-800-841-1410, dooro lambar. 2, kadib dooro 3 midki kamid ah sababaha soo socdo:

- Su'aalo Ku saabsan Koodhkaaga QR
- Su'aalo kusaabsan ku isticmaalka koodhka QR suuqa beeraleyda ama dukaanka beeraha.

Xaruntaada Caafimaadka ee WIC

Warqadda Koodha QR Ee Boostada Lagu Diray

Washington WIC cidna ma takoorto.

Iyadoo la raacayo sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo U.S. Department of Agriculture (USDA, Waaxda Beeraha ee Maraykanka) xeerarka iyo siyaasadaha xuquuqaha madaniga ah, machadkaan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salaysan isirka, midabka, asalka qaranka, jinsiga (ay ku jirto aqoonsiga jinsiga iyo jihataynta galmada), naafanimada, da'da, ama aar-gudashada ama aargoosiga hawlihii hore ee xuquuqda madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaad ku heli kartaa luuqado ka baxsan af Ingiriisiga. Dadka leh naafanimada ee u baahan hab kale oo isgaarsiineed si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta indhoolayaasha, far waaweyn, cajalad maqal ah, Luuqadda Calaamadaha Maraykanka), waa inay la xiriiraan gobolka mas'uul ka ah ama hay'adda maxalliga ah ee maamusha barnaamijka ama Xarunta Technology and Accessible Resources Give Employment Today (TARGET, Tiknoolajiyada iyo agabka la heli karo ayaa Maanta Bixiya shaqo) USDA ee (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama kala xiriir USDA iyada oo loo marayo Federal Relay Service (Laynka Adeegyada Dhagoolayaasha) oo lambarkoodu yahay (800) 877-8339.

Si aad u xaraysato cabashada midab takoorka barnaamijka, Dacwoodaha waa in uu buuxiyaa Foomka AD-3027, USDA Program Discrimination Complaint Form (Foomka Cabashada Midabtakoorka ee Barnaamijka USDA) kaas oo loogu heli karo oonleenka halkan: <https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/USDA-OASCR%20P-Complaint-Form-0508-0002-508-11-28-17Fax2Mail.pdf> (ku qoran Af Ingiriisi), laga helo xafiis kasta oo USDA, adigoo wacaya (866) 632-9992, ama adigoo warqad u qoraya USDA. Warqada waa inay ka koobnaataa magaca dacwoodaha, cinwaanka, taleefan lambarka, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee lagu eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Assistant Secretary for Civil Rights (ASCR, Kaaliyaha Xoghayaha Xuquuqda Madaniga) wax ku saabsan nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee lagu eedeeyay. Foomka AD-3027 ama warqadda la buuxiyay waa in loo gudbiyaa USDA iyadoo lagu dirayo:

1. **boostada:**
U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410; ama
2. **fakiska:**
(833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama
3. **iimeelka:**
program.intake@usda.gov

Hay'addaan waa adeeg bixiye ku shaqeysa fursadaha loo simanyahay.
Washington WIC cidna ma takoorto.

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-841-1410.
Macaamiisha dhagoolka ah ama maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimeel udir wic@doh.wa.gov.



DOH 964-027 May 2023
Somali